



STATE OF WASHINGTON DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

DCYF waxay Aqbaleysaa Araajiida Kooxda La-talinta Waalidka (PAG)

Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska (DCYF) ayaa waxay qoreysaa shakhsiyaadka daneynaya ee u-qalma in ay u adeegaan Kooxda La-talinta Waalidka ee hay'adda. Waaxda marka la joogo, waxaannu aaminsannahay waalidiintu in ay yihiin macallimiinta koowaad iyo kuwa ugu muhiimsan ee carruurta. Waxaannu qoreynaa waalidiinta ama mas'uuliyiinta cunug ama carruurta ay da'doodu u dhaxeeyso 0-17 kuwaas oo la kulmay hal adeeg ama adeegyo badan oo ay bixiso waaxda ama hay'adaha kale ee dowladda, oo ay ka mid yihiin balse aysan ku koobneyn; Barnaamijka Caawimaadda iyo Waxbarashada Xannaanada ah ee Carruurta Yaryar (ECEAP), Bilowga Hore (Head Start), Daryeelka Carruurta, Ladnaanta Carruurta (Child Welfare), TANF, iwm.

Ku Saabsan Kooxda La-talinta Waalidka

Kooxda La-talinta Waalidka (PAG) ee DCYF ayaa waxaa loo aasaasay sannadkii 2007 sida guddi u hadla oo ku biirrinaya codadka waalidka shaqada waxbarashada carruurta yaryar ee DCYF ay qabato; waxay hadda ballaarisay baaxadeeda waxayna ku dartey ladnaanta carruurta.

Hadafka kooxdan laga leeyahay waa in ay wadaagaan oo ayna ka wada munaaqashaan fikrado cusub, bixiyaan talo iyo tusaale, barnaamijyada iyo siyaasadaha "tijaabinta-waalidka", iyo in ay gacan ka geystaan qaabeynta mustaqbalka adeegyada DCYF. Ku lug lahaanshaha waalidka waxay muhiim u tahay in la helo siyaasado iyo barnaamijyo taageera baahiyada iyo awoodaha qoysaska.

Xubnaha waxay ka tarjumayaan kala duwanaanshaha gobolka, isirka, iyo dhaqanka, waxaanna ka go'an sinnaanta isirka, iyo in ay u arkaan wax-ka-qabashada dhaqanka iyo luuqadda sida arrimo muhiim u ah shaqadooda.

Xubinnimada

Xubnaha waxay guddiga u adeegaan ugu yaraan muddo laba-sano ah oo ku eg 30-ka bisha Juunyo ee sannadka labaad. PAG ayaa kulma ugu yaraan lix jeer sannadkii (4 kulanno oo maalintii la qabto iyo 2-3 wacitaanno telefoon oo fiidkii ah – ***codurka COVID-19 awgii ayaa jadwalka inyar wax looga beddelay***). Xubnaha PAG ayaa la filayaa in ay ka soo qaybgalaan shirarka intooda badan iyo in ay u diyaar-garobaan in ay si firfircoon uga qaybgalaan.

Xubnaha waxay xaq u leeyihiin in loo magdhowo ama loo celiyo lacagtii kaga soo baxday safarka (marka la bilaabo in shirarka shakhsi ahaan looga qaybgalo) si gacan looga geysto taageeridda ka-qaybgalka. Kharashaadka loo celin karo waxaa ka mid ah, balse aysan ku koobnayn; kharashaadka safarka, kirada gaariga, duulimaadyada, jiiifka, cuntooyinka, lacagaha jidadka lagu maro, iwm. Kharashka ku baxa masaafada safarka ayaa la celin doonaa iyada oo la raacayo qiimayaasha lacag-celinta safarka gobolka ee hadda iyo si waafaqsan Xeer-nidaamiyayaasha Safarka ee Xafiiska Gobolka Washington ee Maareynta Maaliyadaha. Qiimayaasha hadda ee safarka ayaa waxaa laga heli karaa bartan: <http://www.ofm.wa.gov/policy/10.90.htm#10.90.10>. Waxaan sidoo kale awoodnaa in aan bixinno lacag-celin loogu talagalay shirarka shakhsi ahaanta; waxaannu weyddiinaynaa xubnaha in ay sugaan daryeelka carruurtooda.

Geeddi-socodka iyo Waqtiga

28-ka Maajo, 2021: Araajiida Ayaa La Filayaa

16-ka Juunyo, 2021: Araajiida Ayaa Dib-loo-eegayaa

22-ka Juunyo, 2021: Codsadayaasha Ayaa La Ogeysiinayaa

1-da Luulyo, 2021: Muddada Xil-haynta Xubinka Ayaa Bilaabanaysa

Waxaannu kugu soo dhoweynaynaa in aad su'aalaha uga jawaabto qaab kaa caawinaya in aad sida ugu wanaagsan isu-muujiso. Tani waxaa ka mid noqon kara jawaabo qoraal ah, fiidiyow (YouTube), soo gudbin elektaroonig ah, ama wada-hadal telefoonka ah. Haddii aad jeclaan lahayd in aad jadwaleysato ama qabsato ballanta wacitaan telefoon si aad uga hadasho su'aalaha, fadlan naga la soo xiriir dcyf.communityengagement@dcyf.wa.gov marka ay taariikhdu tahay **20-ka Maajo, 2021**. Haddii kale, fadlan buuxi su'aalaha ka-dibna u soo gudbi mid ka mid ah hababkan marka ay taariikhdu tahay **28-ka Maajo, 2021**:

Email-ka: dcyf.communityengagement@dcyf.wa.gov	Elektaroonig ahaan: SurveyMonkey	Boostada: Community Engagement PO Box 40975 Olympia, WA 98501
--	--	---

Xor u ahaaw in aad nagala soo xiriirto (dcyf.communityengagement@dcyf.wa.gov) haddii aad qabto su'aalo.

Dhammaan macluumaadka hoos lagu wadaagay ayaa keliya loo adeegsan doonaa geeddi-socodkan qorista.

Waad ku mahadsan tahay buuxinta.

Magaca:		Magaalada:	
Lambar(rada) Teleefoonka:		Cinwaan limayl:	
Waa maxay habka ugu wanaagsan ee laguugu la soo xiriiri karo?		Isir iyo Qowmiyad (khiyaari):	

1. Maxay tahay sababta aad u xiiseynayso u adeegista Kooxda La-talinta Waalidka?
2. Waa maxay da'da(da'aadda) cunugaaga(carruurtaada)? - Fadlan tax liiska da'da(da'aadda) cunugaaga(carruurtaada).
3. Ka waalid/mas'uul ahaan maxaad u aragtay in ay abaal-marin leedahay maxaadse ugu jeceshahay?
4. Miyaad hadda ama horey uga qaybgashey kooxda waalidka ama kaalin iskaa-wax-qabsade ahaan loogu shaqeynayo carruur? Haddii ay sidaa tahay, fadlan bixi guudmarka kaalimahaaga iyo waayo-aragnimadaada.
5. Miyaad awooddaa in aad sameyso ballanqaadyada waqtiga ee lagama maarmaanka ah ee Kooxda La-Talinta Waalidka - afar shirar (maalin dhan ama nuskeeda) iyo laba - saddex jeer oo wacitaanno shir ah oo la qabanayo sannad kasta? HAA MAYA
Haddii ay maya tahay, fadlan sharrax:

6. Adeegyo nooc ee ayaad daneynaysaa ama waayo-aragnimo u leedahay?

- | | |
|---|---|
| <input type="checkbox"/> Ladnaanta Carruurta Hinddida | <input type="checkbox"/> Ladnaanta Carruurta |
| <input type="checkbox"/> Daryeelka Carruurta ee Shatiilaha ah | <input type="checkbox"/> Barnaamijka Guri La'aanta (McKinney Vento) |
| <input type="checkbox"/> Taageerada Hore ee La Siiyo Carruurta Yaryar iyo Kuwa Socod-baradka ah (ESIT) | <input type="checkbox"/> Daryeelka Carruurta ee Xilliyeedka ah |
| <input type="checkbox"/> Adeegyada Ka Hortagga iyo Wax-ka-qabashada Waxbarashada Xannaanada ah ee Carruurta Yaryar (ECLIPSE/MTCC) | <input type="checkbox"/> Booqashada Guriga |
| <input type="checkbox"/> Daryeelka Carruurta ee Xiriirrada Shaqo | <input type="checkbox"/> Makhaayadaha Bulshada |
| <input type="checkbox"/> Gargaarka Aan Joogtada Aheyn ee Loogu Talagalay Qoysaska u Baahan (TANF) | <input type="checkbox"/> Kooxda Ciyaarta iyo Waxbarashada ee Kaleidoscope |
| <input type="checkbox"/> Bilowga Hore (Head Start)/ Bilowga Xilliga Hore (Early Head Start) | <input type="checkbox"/> Washington Kindergarten Inventory of Developing Skills (WaKIDS) |
| <input type="checkbox"/> Barnaamijka ECEAP ee Qabiilka | <input type="checkbox"/> Taageerada loogu talagalay Qoysaska Xubin Ka Tirsan uu Xiran Yahay |
| <input type="checkbox"/> Barnaamijka Caawimaadda iyo Waxbarashada Xannaanada ah ee Carruurta Yaryar (ECEAP) | <input type="checkbox"/> Kheyraadka Daryeelka Carruurta iyo Adeegyada Gudbinta |
| <input type="checkbox"/> Kooxaha Aabbayaasha | <input type="checkbox"/> Daryeel Korsasho |
| <input type="checkbox"/> Is-bahaysiga Gobolka ee Waxbarashada Carruurta Yaryar | <input type="checkbox"/> Bilowga Hore (Head Start)/Guulaystayaasha Hore (Early Achievers) |
| <input type="checkbox"/> Adeegyada Dhaqancelinta Hab-dhaqan | <input type="checkbox"/> Kale: |
| <input type="checkbox"/> Kale: | |

7. Iyada oo lagu saleynayo liiska kor ku xusan, fadlan nala wadaag sheeko saameyn kugu yeelatay ama caqabad aad la kulantay (khiyaari).

8. Waa maxay saameynta aad rajeynayso in aad aragto kooxdan in ay ku yeelato Gobolka Washington, oo sidee jeclaan lahaydin aad gacan uga heysatao dedaalkaas?

9. Sideed ku maqashay fursadan?

10. Fadlan nala wadaag wax kasta oo kale ee aad jeclaan lahayd in aan ka oggaano adiga, qoyskaaga iyo waayo-aragnimadaada.